# Amaanka Shaqada iyo Ku Dhaawacanka Shaqada (Xaqsiinta Shaqaalaha)

**Work Safety and Getting Hurt at Work (Workers' Comp)**




## Waa maxay xaquuqdaydu?

Hadii aad aaminsan tahay in xaaladaha ka jira goobtaada shaqadu inay khatar kuu gelinayaan geeri ama dhaawac culus oo ku soo gaara, **waa aad diidi kartaa inaad ku shaqayso xaaladahaa aan amaaka ahayn**. Waxa aad heli kartaa caawimaad si aad uga dhigto goobtaada shaqada mid amaan ah.

Waxa aad xaq u leedahay:

- Inaad kala hadasho wixii walwal ah ee aad qabto ee ku saabsan amaanka iyo saxada shaqada ama hay'ada OSHA ee Minnesota (Occupational Safety and Health Administration).

- Waydiiso shaqadaada tababar hadii mar walba aad ku dhex jirto xaalado aan amaan ahayn.

- Waydiiso shaqada in qof qaabilsan fatashida amaanka loo sameeyo goobta shaqada. Kala xiriir hay'ada Minnesota OSHA khadka ah 1-(877) 470-OSHA ama 651-284-5050. Ama emayl ugu dir ciwaanka ah: OSHA.compliance@state.mn.us.

Shaqada lagaagama eryo karo baxarna kuma gali kartid isku dayga ah inaad hesho goob shaqo oo amaan ah ama diidmada inaad ka shaqayso goob aad runtii aaminsan tahay inay naftaada khatar galinayso.

## Hadii aan qabto in goobta shaqadu aysan amaan ahayn, ma diidi karaa shaqada?

- Hadii aad qabto aaminsanaan macquul ah oo ah in goobta shaqada xaaladeedu aysan amaan ahayn, u soo sheeg taa qolada shaqada.

- Hadii qolada shaqadu aysan wax qaban karin ama aysan doonayn inay wax ka qabato xaalada goobta shaqada ee aan amaanka ahayn, waxa dhici inaad xaq u yeelato inaad shaqada ka dhaqaaqi karto. Waxaad kalood yeelan kartaa xaq ah in lagu siiyo lacagta shaqada ee aad wayday mudadda aadan shaqeynayn.

- **Laakiin,** hadii aad shaqada ka dhaqaaqdo ogolaansho la'aan, ka dibna ay qolada shaqadaadu ay go'aamiso in goobtaada shaqadu ay amaan ahayd iyo/ama aaminsanaantaada in aysan goobta shaqadu amaan ahayn aysan ahayn wax jiray, kolkaa waxa aad mutaysan kartaa ganaaxid.

- Hadii aad u sheegto qolada shaqadaada goobta shaqada ee aan amaanka ahayn ayna kuu diraan shaqo meel kale ah oo ka dheer goobta aan amaanka ahayn, waa khasab kolkaa inaad sameyso shaqada laguu diray.

## Ma aan bedeli karaa xeerarka amaan-sugida ee goobta shaqada?

- Ma aha inaad sameyso ama wax ka bedesho habka amaanka ee goobta shaqada kaligaa.

- Hadii aad hayso wax ra'yi ah oo wax looga bedelayo habka amaanka ama ra'yi cusub oo ka dhigi kara goobtaada shaqada mid amaan ah, u keen ra'yiyadaada qoladaada shaqada.

- Qaar badan oo ka mid ah qolyaha loo shaqeeyo ee Minnesota waxa ay abuuraan gudiyo amaan oo shaqaalahu ay qayb ka yihiin. Ujeedaduna waa in:
  - lagu aqoonsado xaaladaha goobaha shaqada ka jiri kara ee aan amaanka ahayn.
  - lagu helo ra'yi cusub oo wax looga qabanayo xaaladaas shaqada ee aan amaanka ahayn
  - lagu qaabeeyo xeerar amaanka ku saabsan iyo xeerar kale oo shaqada ah in looga dhigo goobta shaqada mid amaan ah.

Hadii aad danaynayso amaanka goobta shaqada, waydii qolada shaqadaada inaad ku biirto Gudiga Amaanka.

## Hadii aad qabto in goobta shaqadu aysan amaan ahayn, qolada shaqaduna aysan wax ka qaban, Maxaan kaloo sameyn karaa?

Waxa aad u soo sheegi kartaa walaacaaga hay'ada Minnesota OSHA. Kala xiriir 1-(877) 470-OSHA or 651-284-5050. Ama emayl ugu dir: OSHA.compliance@state.mn.us.



Shaqadaadu kuguma ganaaxi karto kaagamana aarsan karto adiga (ka ciil beelid) u soo sheegida aad u soo sheegayso goobta shaqada ee aan amaanka ahayn hay'ada Minnesota OSHA.

## Ka waran hadii aan shaqada ku dhaawacmo?

Hadii aad leedahay dhaawac ama cudur kugu soo gaaray ama ay uga dartay shaqadu, waa in lagu siiyaa Xaqqa shaqaalaha shaqada ku Dhaawacma ama "(Workers' Comp)." Xaqqa shaqaalaha shaqada ku dhaawacma waa nooc caymis ah oo ay qoladaada shaqadu ku galiso si uu xaq kuu siiyo lacala hadii aad shaqada ku dhaawacanto.

Sharciga Xaq-siinta shaqaalaha ee Minnesota waxa uu leeyahay dhamaan qolo walba oo loo shaqeeyaa waa inay bixiso kharashka caymiska shaqaalaha ama ay iyagu iskood caymis isu noqdaan. Habka xaq-siinta shaqaalaha dhaawacmaa waxa uu ku siin macfacyo hadii aad shaqada

ku dhaawacanto ama ku jirato. Waxa uu bixiyaa kharashaadka dhaawaca ama jirada ay keentay ama ay uga dartay shaqadu ama goobta shaqadu.

Hay'ada xaqqa shaqaalaha dhaawacmaa waxa ay bixisaa:

- daryeeada caafimaad ee la xiriira dhaawaca, ee macquul ah loona baahan yahay
- manfacyada lacagta shaqada ee la waayey oo ah qayb dakhliga dhumay ah
- manfacyada xaqqa jaa'ifada joogta ah ee jirka soo gaarta
- manfacyo la siiyo cidii aad mas'uulka ka tahay hadii aad u dhimato dhaawac shaqo
- adeegyada tababarka iyo xirfadeyn ah hadii aadan ku noqon karin shaqadaadii hore ama shaqo aad hore uga shaqeyn jirtay intii aadan dhaawacmin.
- Maylka la socdo si loo tago balamaha daryeelada caafimaad iyo/ama hawlo gaar ah oo ah tababarka iyo dib u xirfadeynta

## Maxaan sameeyaa hadii aan shaqo ku dhaawacmo?

- Ugu soo sheeg dhaawaca, xataa hadii uu wax iska yar yahay, kormeerahaaga sida si ugu dhaqsaha badan! Ha sugin muddo ka badan 14-cisho laga bilaabo maalinta uu dhaawacu dhacay ama maalinta aad ogaatay in cudurkaagu uu shaqada la xiriiro. **Waxa aad waayi kartaa manfacaaga hadii aad sii sugto.**

- U tag dhaqtar aad adigu xulatay.



- Hubi in qolada shaqadaadu ay ka xareyso "Warbixin Dhaawac" shirkada Xaq-siinta Shaqaalaha Dhaawacma.

- La socodsii mar walba qoladaada shaqada xaaladaadu meesha ay marayso iyo wixii shaqo xadidid ah ee aad haysato.

- Kala har nuqulo dhamaan dukumiintiyada oo dhan

## Maxaa dhici hadii dhaawacayga la qabalo?

- Caymiyahu waa khasab inuu kaaga soo diro nuqul "Ogaysiiska Caymiyaha ee Go'aaminta Cidda Asal ahaan Qaanta lagu leeyahay." Kani waa foom sheegaya in qaan sheegadkaagii la aqbalay.

- Caymiyahu kolkaa waa khasab inuu kuugu bilaabo bixinta manfacyada xaqqa shaqada 14-cisho gudahood laga bilaabo maalinta aad la socodsiisay qolada shaqada dhaawacaaga shaqada kugu soo gaaray iyo waayida lacagta shaqada. Waa khasab inaad u hesho manfacyadaada si la mid sida aad u hesho lacagtaada shaqada – sida asbuuc walba ama asbuuc dhaaf iwm.

- Dhaawacyada waqtigoodu u dhaxeeyo Okt. 1, 2000, and Sebt. 30, 2008, ka dib kolkii lagu siiyey lacagta 52 asbuuc oo ah manfacyada naafanimada buuxda, kolkaa caymiyahaagu waa khasab in qoraal ahaan kugu soo ogaysiiyo arrinta ah xadidaada 104-asbuuc ah ee manfacyadani ay leeyihiin.

- Dhaawacyada waqtigoodu ka dambeeyey Okt. 1, 2008, ka dib kolkii lagu siiyey lacagta 52 asbuuc oo ah manfacyada naafanimada buuxda, kolkaa caymiyahaagu waa khasab in qoraal ahaan kugu soo ogaysiiyo arrinta ah xadidaada 130-asbuuc ah ee manfacyadani ay leeyihiin.

- Ka hor inta aan la wada bixin 80 asbuuc ee manfacyada ah, caymiyahu waa khasab inuu qoraal ahaan kugula soo socodsiiyo, xadidaada ku saabsan waqtiga aad codsan karto dib u tababarid.


## Ka waran hadii dhaawacayga la diido?

- Caymiyahu waa khasab inuu kaaga soo diro nuqul "Ogaysiiska Caymiyaha ee Go'aaminta Cidda Asal ahaan Qaanta lagu leeyahay." Kani waa foom sheegaya in qaan sheegadkaagii la diiday. Foomkani waa inuu si cad u sharxaa xaqaa'iqa iyo sababaha qaantaada loo diiday.

- Hadii aad ogolayn diidmada, la hadal qofka qaantaada u qaabilsan caymiska ee haya dacwadaada.

- Hadii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan shaqo ku noqosho laakiin qaantaadii la diiday, ka wac Qaybta Tababarka iyo Xirfadeynta khadka ah (651) 284-5038 ama (888) 772-5500 ka dibna waydiiso la talin ah dib u tababarka.

## Ka waran hadii qoladayda/caymisku ay doonayaan inaan anigu aado waxa la yiraa insurer (IME)?



Caymiyahu waxaa dhici karta inuu ku waydiisto inaad u tagto dhaqtar ama daryeel caafimaad bixiye kale oo ay iyagu wataan. Baaritaankan waxaa badanaa loogu yeeraa baaritaan caafimaad ee madaxa banaan (IME). Caymiyahu waa uu laali karaa manfacyada aad hesho hadii aad diido inuu ku baaro dhaqtarkaasi. Caymiyahu waa khasab inuu bixiyo lacagta maylka iyo wixii kale ee kharashaad ah ee kuu gala aadida balantan baarida ah awgeed.

## Ma la kala jecel yahay cidda khaladka leh? Caawimo Raadso.

MAYA! Kiisaska intooda badan lama kala jecla cidda khaladka wixii dhacay leh. Hadii aad shaqo ku dhaawacanto oo aadan hubin xaquuqdaada, wac qareen ama ka wac Waaxda Shaqada ee Minnesota (Minnesota State Department of Labor) khadka ah (651) 284-5005 ama 1-(800) 342-5354. Ama gal shabakadooda (website) ah: www.dli.mn.gov.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**